

SU'AALAHHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO

1

Maxaa looga hadlay shirka London ee Soomaaliya ee la qabtay 11-ka May?

- Xoojinta Ammaanka Qaranka iyo Damaanad Ammaanka caalamiga ah.
- Siyaasad dagan oo loo dhan yahay.
- Kabsasho dhaqaale.
- Ayidida iskaashiga cusub ee Soomaaliya.



2

Waa maxay Heshiiska Qorshaha Amniga Dalka?

- Heshiis siyaasad oo taariikhi ah oo u dhaxeeya Dowladda Federaalka ee Soomaaliya iyo Maamul Goboleedyada oo la gaaray April 2017-ka.
- Heshiiska waxaay udub-dhexaad u tahay ka miro dhalinta dib u habayn amni oo waara iyo kala wareejinta mas'uuliyadda ammaanka iyadoo AMISOM ku wareeijn doonto xooggaga ammaanka ee Soomaaliya.

3

Muxuu ka kooban yahay Heshiiska Amniga?

- Qorshe dib loogu habeynayo ammaanka oo qayb ka ah qaab ballaadhan oo lagu abuurayo ammaan waara, oo ay beesha caalamka dooneyso in uu socdo si loo helo taageero joogta ah.
- Heshiis siyaasadeed oo u dhaxeeya dowladda federaalka ah iyo dowlad goboleedyada oo ku aadan qaab dhismeedka amniga qaranka.
- Ballamo ku saleysan shuruudo ka yimid dalalka saaxiibada nala ah, oo ah in la taageero laamaha amniga, oo lagu xaqiijin doono shir caalami ah oo gaar ah oo dhici doona 6 bil gudahood.
- Waxaa lagu heshiiyey in AMISOM ay qayb weyn ka tahay xaqiijinta ammaanka Soomaaliya, iyadoo xilka ku wareejinta AMISOM ee ciidamada ammaanka Soomaaliya ay sharuudo ku xirnaan doonto.
- Waxaa jiri doona qaab wax ku ool ah oo lagu hirgalinayo, dib u eegisna loogu sameynayo dhaqan galinta ballamaha heshiiskan lagu sheegay

4

Waa maxay habka dhameystirin ee amniga (CAS), taas oo qayb ka ah heshiis dhinaca ammaanka ee lagu soo bandhigay shirka?

- CAS waa qaabka guud ee ballanqaadyada caalamiga ah, oo waafaqsan mabaadi'da loo yaqaan 4As (la goyni karo, la aqbali karo, lala xisaabtami karo iyo la awoodi karo), oo hoos yimaado shan goobood oo shaqo:
 - o Awood-siinta hawlaha wax ku ool ah AMISOM, ay ka mid yihiin u gudubka ammaan ay Soomaaliya horseed u tahay.
 - o Horumarinta hay'adaha amniga Qaranka Soomaaliya.
 - o Taageerada qorshaha xasilinta dowladda Soomaaliya iyo dib u soo kabashada bulshada / awooda dowladda (CRESTA / A).
 - o Ka hortagga xagjirnimada daran.
 - o Kobcinta taageerada caalamka ee oo ay ka mid tahay dhisidda hab isuduwid wax ku ool ah.



5

Waa maxay horumarka la isku raacay ee habka dhamaystiran ee ku aadan ammaanka?

- 2017 - 2018: Heshiisyada siyaasa deed iyo xoojinka xiriirka u dhexeeya FGS IYO FMSs.
- 2018 - 21: Suggidda Amniga shacbiga Soomaaliyeed si ay si buuxda u codeeyaan doorashada.
- 2027: Hay'daha AmnigaSoomaaliyeed oo tayeysan oo waaro lagu maalgelinayo dakhliga dalka.

6

Maxay ahaayeen natiiyooyinka ka soo baxay shirka ee ku aaddan waxqabadka banii'aadanimamada ee Soomaaliya?

- Howlwadeennada waxaa ay ka hadleen ka hortagga abaaraha oo ay xiqiijiyeen in ay ka go'antahay in ay kor u qaadaan dadaalka.
- Dib-u-eegis lagu sameeyay Qorshaha Waxqabadka Banii'adanimada ee Soomaaliya ay lagu soo bandhigay codsi lagu codsanayo lacag gaaraysa 1.5 bilyan dollar oo lagu dardargelinayo howlaha banii'aadinimo.



7

Maxaa looga wada hadlaya shirka ee ku aaddan dib u soo kabsashada dhaqaalaha Soomaaliya?

- Kabsashada dhaqaalah waa mud naan lagu horumarinayo hab-no loleedyada, shaqo abuur iyo dakhli dhallinta dakhliga gudaha.
- Tani waxay hoos u dhigi doonta nuglaanshaha, adkeynta xasiloonaada iyo horumarinta xal waara oo la wada dhanayahay oo adkeysii leh.
- Afarta Sanna Heshiiska Qorshaha Kabsashada Iskaashiga Dhaqaalah ee u dhexeeya shirkadaha dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ayaa lagu aasaasay shirka.

8

Maxaa ugu dhiganyahay dalka Soomaaliya Iskaashiga Cusub (NPS)?

- NPS ayaa diyaarinaya ka go'anaanshaha Beesha Caalamka si loo waafinayo taageerada horumarka Soomaaliya ee waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka.
- NPS waxaa lagu saleeyay mabd'a la xisaabtanka labada dhinac u dhexeeya Soomaaliya iyo taageerayaasheeda caalamiga ah, iyadoo labada heshiis uu ku salaysanyahay mabaa'dii xukumeysa iskaashiga.
- Waxaa ay u oggolaanaysaa Soomaaliya in ay si buuxda u qaadato hogaanka dejinta ajeendaha horumarkeeda iyo in ay Soomaaliya ka faa'ideysato qorshe howlwadeennada ku heshiayaan in ay raacaan.
- Habsocodka Horumarka waxaa la gudbin doonaa sannadkiiba labo jeer inta lagu guda jira Iskaashiga Shirarka ee Heerka Sare ah ee lagu qabanayo Muqdisho ama caasimadaha Howlwadeennada Caalamiga ah.

9

Sidee Shirka looga qaybgaliyay bulshada rayidka?

- Talooyinka lagu soo bandhigay shir horudhac ah oo 2dii May magaalada Muqdisho ka dhacay, ayna ka soo qayb galeen wakiilada 150 ururada bulshada rayidka ah, ayaa looga hadlay shir barbar socday shirkii London.
- Waxaa shirka lagu qaybiyey buug ay ku qoran yihiin natiiyooyinka waayaragnimada iyo xirfadaha ay uruada bulshada rayidka iyo qurba joogta ku tabarucii karaan, si sare loogu qaado horumarka wanaagsan ee Soomaaliya.